

Gargaarka luuqadda

Adeegyada gargaarka luuqadda ayay si bilaash ah ku heli karaan macaamiisha Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA), oo ay ka mid yihiin adeegyo ay si toos ah u fidiyeen shaqaale laba luuqadood ku hadla, adeegyada turjumaanka, iyo turjumaadda agab daabacan.

Hel macluumaaad ku saabsan caynsanaanta caymiska Washington Apple Health (Medicaid)

Loogu talogaley dadka waaweyn ee da'doodu u dhaxeyso 18 ilaa 64 sano jir iyo kuwa raadinaya caynsanaanta carruurta iyo dumarka uurka leh

- Wac 1-855-923-4633
- [Hel dallaal ama hagaha degaanka ee qof ahaanta ah](#)

Caynsanaanta ku saleysan naafonimada ee loogu talogaley shakhsiyadka indhoolaha, naafada, ama da'doodu u dhaxeyso 65 ama ka weyn

- Wac 1-877-501-2233
- [Dukaamada yar-yar ee kuyaala Xafiiskaaga Adeegaha Bulshada DSHS](#)

Loogu talogaley shakhsiyadka u baahan daryeelka muddada dheer

Oo ay ka mid yihiin daryeelka guriga xannaaneynta ee dadka duqobey, daryeelka shakhsii ahaaneed ee guriga-gudhiisa, xannaaneyyo waayeelka ama naafada, iyo barnaamijyada guriga qoyska qaangaarka.

- Wac 1-800-422-3263
- [Hel Xafiiska Adeegyada Guriga iyo Bulshada DSHS ee degaanka](#)

Hel agab la turjumey

1. Tag bogga Foomamka iyo daabacaadaha ee mareegtada HCA:
www.hca.wa.gov/apple-health-client-forms.
2. Hel looxa “Raadi” ama “Search”.

3. Looxa “Raadi” gudahiisa, ku qor ereyada muhiimka ah ama magaca dokumeentiga HCA oo Af-Ingiriis ah, ama ku qor lambarka dokumeentiga. Guji badhanka “Raadi”.
4. Xulo “Hel Foom” ama “Hel Daabacaad” ka-dibna xulo dokumeentiga laga heli karo luuqadda la doorbido ee liiska taxaalka dalabka ee hoos u socda.

Haddii aadan arkin agab ku qoran luuqadda aad u baahan tahay?

Waxaad heli kartaa caawimo ama, haddii ay lagama maarmaan tahay, codso in agabka HCA la turjumo. Ka wac HCA 1-800-562-3022.